



## PORLAND PUBLIC SCHOOLS

501 N Dixon | Portland, OR 97227 | www.pps.net | pubinfo@pps.net | (503) 916-2000

# Ku soo dhawow Sanad Dugsiyeedka 2022-2023!

Ogosto 29, 2022

Ardayda iyo qoysaska sharafta leh ee PPS,

Wxaan rabaa inaan idin la wadaago "Soo Laabad" xiise badan! Wuxaan filayaa inaad ka hesheen fasixiinii xagaaga oo aad xiise iyo tamar badan u haysaan sanad dugsiyeed wanaagsan.

Halkan PPS, waxa na haga [himiladeena](#) hammiga badan, taasi oo iftiimisa qaabab badan oo aanu rabno ardaydeena qalinjabisaa inay adduunka u galaan: kalsoon, niyadsan, una diyaarsan mustaqbal baraare badan. Nidaamkani wuxuu sharraaxayaa sida ay barayaal ahaan, iyo nidaamka dugsiga, ay waajib ugu tahay sii wadidda xannaanaynta xarifnimada ardaydeena. Sanad dugsiyeedkan kambas kasta, waxaanu shiishka saari doonaa inaanu u abuurno oo xoojino waayo-aragnimo waxbaris iyo waxbarasho oo farxad leh, loo dhan yahay, oo tayo sarraysa arday kasta, maalin iyo goor kasta. Kani waa shiish-saarkayaga cusub, waanan ku faraxsanahay sanadka aynu galayno.

Immika oo sanadkii lixaad iigu soo galay PPS, iyo ugu dhawaan soddon sano oon waxbarashada dadwaynaha ku jiray, maalin kasta oo dugsigu jiro waxay had iyo jeer ii keentaa dareen farxadeed iyo niyadsamaan. Wuxaan u rajaynayaa sanad kale oo fursadihiisa wata ardaydeena: saaxiibo cusub, koorsooyin tacliineed oo adag, waxqabadyo waxyaalaha ay daneeyaan bannaanka soo dhiga: ciyaaraha fudud, naadiyada ardayda, waxbarashada farshaxanka, iyo barnaamijka waxbarashada farsamada, iyo xusuuso aan dhammaad lahayn.

Qaar badan oo ka mid ah ardayda iyo shaqaalaheenu xagaagii mashquul ayey ahaayeen, iyagoo kaqaybqaadanaya barnaamijyadayada xagaagii ee tirada badan iyo fursadaha waxbarasho. In ka badan hal arday shantii ardaydeena ah ayaa kaqaybqaatay barnaamij xagaa oo PPS ka masuul tahay; boqolaal ah barayaasheena iyo hoggaamiyayaasha dugsiyada ee PPS ayaa kaqaybqaatay waxbarasho xirfadlenimo oo waafaqsan [qaabdhismedkeena waxbariseed](#) ee cusub, kaasi oo qeexaya waxay u eg yihiin waxbaris iyo waxbarasho heerar ku salaysan, dhaqan ahaan sugar oo tayadoodu sarrayso halkan PPS. Wuxaanu rumaysannahay in waxyaalahan daruuriga ah ay xoojin doonaan oo abuuri doonaan bii'ado waxbarasho oo ardaydeenu dareemayaan in la danaynayo, halkaasi oo filashooyin sare ay muuqdaan, halkaasi oona waxbarista iyo waxbarashada adag ay tahay dhaqan maalinle ah.

Maadaama oo aad isku diyaarinayso bilaabidda dugsiga berri, waxaan ku kalsoonahay inaynu diyaar nahay! Hoggaamiyayaasha, macallimiinta, iyo shaqaalahayaga dugsigu waxay sugi kari la'yihii inay kula kulmaan oo ay sanad dugsiyeedka farxad ku bilaabaan.

Wuxaan kuu rajaynayaa sanad dugsiyeed wanaagsan,



Guadalupe Guerrero  
**Kormeeraha Guud**